



SOMTECH ACADEMY

# MAAMULKA **HALISTA** FOREX RISK MANAGEMENT

**Qoraa:**

MUSTAF YUSUF HUSSEIN  
Hilwaa-Mogadishu-Somalia

## **BARO MAAMULKA HALISTA**

Maamulka halista waa xubin dhan oo muhiim ah oo kamen xirfadda FOREX trading, waana xubin si gaar ah loogu takhasuso, inaad barato waxeey kaa caawineysaa inaad noqoto xirfadle guul kagaara suuqa FOREX.



---

<http://www.somtechnew.com>

Email: [yuusufmustaf54@gmail.com](mailto:yuusufmustaf54@gmail.com)

Phone: +252617017428

<b>Magaca Cutubka</b>	<b>Bogga</b>
Ma Ogtahay Akhriste?	<b>6</b>
Maxaa Qabsada Soomaalida?	<b>6</b>
Marka Hore Wuxaad Niyadaada Galisaa In Forex uu Leeyaha Khasaaro	<b>8</b>
Sida uu U Shaqeeyo Forex	<b>8</b>
Isweydii Su'aalahaan Mar Walbo oo aad Ku hamiso in aad Faa;iido Sameyso	<b>8</b>
Qaladaadka Sabab In Uu Kaa Gubto Akawnkaaga Forex	<b>9</b>
Si Khasaaraahaagu U Xakameysnaado Waxaa Muhiim Ah In Aad Ku Xisaabtanto Qodobadaan	<b>9</b>
Sidee Loo Soo Saaraa Lot Size Ka Akawnkaaga?	<b>9</b>
Su'aal Muhiim Ah	<b>10</b>
Haddaba Waxaa Jira Akawn Loo Soo Ja-Jabi Karo Lotka	<b>10</b>
Akawnka Ee Kujirto \$1000 Sidee Ugu Qeebin Karaa Trade Yada Lot Size Ka? 10	<b>10</b>

<b>Lot Size</b>	<b>11</b>
Noocyada Lot Size-Ka	11
Muhimmada Stop Loss Order	12
Cawaaqib Xumada Ka Dhalan Karta Haddii Aad Iska Indha Tirto Ama Aad Ilawdo Stop Loss-Ka!	12
Waligaa Ha Galin Trade Bilaa Stop Loss Ah	13
Imisa Pip Oo Stop Loss Ah Ayaan Ku Xiri Karaa Trade Yada Aan Galo	13
Muhimmada Ee Leedahay In Aad Stop Loss Ka Xooga Dheereesato	13
Halkee La Dhigtaa Stop Loss Ka	14
Risk Reward Ratio	15
I:1 Risk Reward Ratio	15
Waxyaabaha Aanu U Wanaagsaneen I:1 Risk Reward	16
I:2 Risk Reward Ratio	17
I:3 Risk Reward Ratio	18
Over Trading	19
Waa Maxay Over Trading	19
Sidee Ayuu Halista Intaa La'eg Uleeyahay Over-Trading	19
Si Aan Over Trading Usameen Maxaan Sameeyaa	20
Haddii Aan Over-Trading Sameeyo Maxaa Dhacaayo	20
Muhim	21
Hadaf Faa'iido (Target Plan)	22
Si Aad Hadafkaaga Faa'iido U Xaqijiso Raac Qodobadan	22
Maxeey Kaa Caawineysaa In Aad Daily Target Yeelato	22
Isxisaabi!	23
Muhimmada Ee Leedahay Inaa Xisaabtamto	23
Khiyanada Shirkadaha Soo Badanaya Ee Maalgelinta	24
Xasuusin	24
Haddaba Sidee Uga Badbaadi Kartaa In Aad Ugacan Gasho Qolooyinka Aan Kasoo Hadlay	25
Dhagarta Qolada Sameysa Account Management	26
Waa Maxay Horta Account Management	26
Halkee Ka Heli Karaa Signals Tayo Leh Oo La Hubo	27
Isticmaal Lverage Macquul Ah	28
Waa Maxay Lverage	28
Sidee Ayuu Saameen Ugu Leeyahay Profit/Loss	28
Qiso Gaaban Oo Iga Qabsatay Forex	29

# Maamulka Khatarta

## Ma Ogtahay Akhriste?

In 90% dadka bilaawga ah ee ku khasaaraan forex mudo 90 Maalin ah gudahood! Kadibna ey kaniyad jabaan suuqa iyagoo ka aamina in ee tahay meel lagu dhaco hantidooda, badanaa dadka ku cusub forex waxeey lakulmaan khasaaro joogta ah kaasoo keena ugu dambeyn in eey kaniyadjabaan, maxaa yeelay markii hore ayaa looga sheekeeyay in forex ey tahay meel si fudud iyo mudo gaaban looga taajiro, dabadeedna waxeey hilmaamaan in forex uu ku hareeresanyahay qatar horseedi karta in hantidooda oo dhan gebi ahaanba ey kuweyn karaan-Waa haddii eysan kataxadarine.

## Maxaa Qabsada Soomaalida?

Soomaalida marka hore waxaa looga sheekeeyaa in lacag badan ee taalo forex qofkuna u horseedi karto in uu ciyoow taajiro, badanaa waxaa sidaan uga sheekeeya saaxibadood ama qaar kamid ah qaraabadooda, ama waxee ka daawadaan Facebook ama Youtube, ama waxee arkaan qof meel sare kagaaray suuqan oo xirfadle ah, dabadeedna waxey is dhahaan hebel lacagtuu kasameey camal adne kasamee! Isma weydiino qofkaas intee in la'eg ayuu kubilaaway ganacsigan? Mudo intee la'eg ayuu kujiray? Imisa jeer ayuu soo kufay ama uu soo gubay akawno? Dabadeedna iyagoon cilmiigii si qoto dheer udhexgalin ayee real account ku deg-degaan iyagoo isleh kataajir, waxeey ku bilaawaan lacag aad uyar oo aan suuqa waxbo ka aheen sida \$100 i.w.m lacagta maalgashiga haba yaraatee waxeey qaataan 100% risk, dabadeedna waxaa laga yaabaa in bisha koowaad uu faa'iido waali ah sameeyo qofku, taasoo kusii dhiirigalineysaa in uu sii laba jibaaro

riskiga uu qaadanayo, waxaana xigta bisha dambe in halmar samada lagasoo gamo sida dhagax culus oo kor loo tuuray camal dabadeedna uu ku waa bariisto maalinka xiga akawnkii oo faaruq ah, markaas ayuu xanaaqaa oo uu kashaleeyaa isagoo isleh “war tolow isbuucii hore faa’iidadii waalida aheed aan sameenayay hadaan haaf kala bixi lahaa maanta akawnkeegu ma faaruqeen ugu yaraan lafaheega waa ii badbaadi lahaayeen” sidaas ayuu ku calaacalaa qofka, dabadeed maalinta xigta hadana inta lacag kale uu deposit gareeyo ayuu raadiyaa meel ama qolo bixiso signal tayo leh, wuxuu u gacan galaa qolo iyaguba markii hore suuqa kusoo jahwareeray oo faa’ido doon ah, markaas ayuu ka iibsada wax ey ugu yeeraan VIP Signals, dabadeed labo (2) isbuuc markuu signals kii qaato kadaroo dibi dhal waaba khasaaro miiran akwnkiisa almost 50% waa gubay, labo khasaare ayuu qabaa (1) waxaa ka khasaartay lacagtii uu ku iibsaday signals ka (2) waxaa khasaare kale oo kadran galiyay VIP Signals kii uu iibsaday, markaas ayuu inta yar ee ugu hartay akwnka ku raadiya Account management qolo sameyso, qolodaas ayuu udhiibtaa isagoo isleh kuwan weey kaaga aqoon badanyihii suuqa oo khasaar ahii ku gaaray wee kuu soo celi karaan ugu yaraan, markaas ayeeey (Waa raga uu udhiibtay account managemen) inta Yar ee ugu hartay sii dhameestiraan oo kubaashaalaan kkkk.

Dabadeed waxaa xigta in uu aflagaadeeyo mar dulaalka oo ku yiraahdo waa tuugo dadka dhacda, iyo in uu forex oo dhan ka aamino meel hoog iyo halaag ah oo lacagta dadka lagu dhaco, wuuna kaniyad jabaa suuqa wuuna iskaga baxaa suuqa isagoo welwesan, careysan, niyad jabsan, bahdilan. Dabadeed waxaa laga yaabaa in uu raadiyo meel lagu barto wuxuu kubiira IML oo lacag waali ah looga qaataa, ama wuxuu kubiiraa Academic soomaali leedahay isagoo kulumiya lacaga kale wax usoo kordhana malaha iyo wax kafaa’ido arimahaan oo dhan waxaa

U sabab ah risk management la'aan, iyo qorshe la'aan waayo hadaadan baran sida loo xakameeyo khasaaraha (Risk Management) ama IML kubiir ama Academic ugu fiican kubiir waligaa waxaad kujireysaa uun khasaaro joogta ah iyo buuq.

## **Marka Hore Wuxaan Niyadaada Galisaa In Forex uu Leeyaha Khasaaro**

Waa muhiim marka hore in aad niyada ku heysos in Ganacsiga Forex lagu khasaari karo, arintaas Forex wuxuu kalamid yahay ganacsiyada kale ee caadiga ah kuwaas oo leh fa'iido iyo khasaaro intuba.

Hase Ahaate waxaa Muhiim Ah In Khasaaraahaagu Xad Yeesho oo uusan xadka kabixin si aad muddo dheer uga sii shaqeysato suuqa.

## **Sida uu U Shaqeeyo Forex**

Forex waa ganacsi aad ku qasbantahay in aad qatar (risk) galiso qeyb kamid ah hantida aad maalgashatay si aad faa'iido uga soo saarto, dad badan kuma baraarugsana arintan taasi waxee keenaysaa inaanu qofka iska xilsarin mas'uuliyada saaran oo ah ilaalintada hantidiisa iyo ganacsigiisa, waa muhiim in aad maanka ku heysos in ey waajib kugu tahay in aad qatar galiso qeyb kamid ah lacagtaada-Intee doontaba hala ekaatee- kahor intaadan ku fakirin in aad faa'iido sameyso.

## **Isweydii Su'aalahan Mar Walbo oo aad Ku hamiso in aad Faa'iido Sameyso**

1. Boqolkiiba intee in la'eg oo kamid ah hantideeda ayaan halis galin karaaa?
2. Lacalla haddii aan ku khasaaro dhaawac intee la'eg ayuu ugaysan karaa akawnkeega?
3. Cadadka lacageed ee aan halis galinayo ma uqalmaa akawnkeega oo ma xamili karaa?

4. Muddo dheer suuq makusii jiri karaa marka loo eego xaddiga lacageed ee aan risk galinayo?

Su'aalahaas ayaa loo baahanyahay in aad is weydiiso kahor intadan galin trade, haddii aadan su'aalahan is weydiin waxaad ogaataa in aad ku fashilmi doonto forex oo aadan kusii jiri doonin suuqan mudo dheer.

## QALADAADKA SABAB IN UU KAA GUBTO AKAWNKAAGA FOREX

1. Lot Size aad u weyn oo aanu uqalmin akawnkaaga
2. Stop loss la'aan, ama inaa trade gareyso trade bilaa stop loss ah
3. Over trading (In aad trade-yo farabadan halmar iska daba furto)
4. Risk reward ratio la'aan
5. Istiraatijiyad aan shaqeeneen
6. In aad aaminto trade idea qof kale oo aad iska qaadato adigoon research kusameen
7. Qorshe iyo target la'aan

## SI KHASAARAHAAGU U XAKAMEYSNAADO WAXAA MUHIIM AH IN AAD KU XISAABTANTO QODOBADAAN

1. Waa in aad soo saari karto lot ka ugu habboon akawnkaaga
2. Waa in aad ogaa karto inta pip oo aad stop loss kadhiga karto
3. Risk reward ratio waa inuu ku saleysanyahay trade yada aad gasho
4. Waa in aad ogaa karto daily targetkaaga
5. Waa in aad iska ilaalso Over Trading (MUHIIM!)

## SIDEE LOO SOO SAARAA LOT SIZE KA AKAWNKAAGA?

Isticmaal qaacidadan;

1. Lot Size = 10 000/Balance

Tusaale:

Aa kasoo qaadno akwnkeega waxaa iigu jirto \$100

**Lot Size = 10 000/100**

**Lot Size = 0.01**

:- Tan waxee kadhigantahay haddii akawnkeega ee kujirto \$100 lot ka ugu badan aan u isticmaali karo trade yada aan galaayo waa 0.01 lot

## **Su'aal Muhiim Ah**

Kasoo qaad akawnka ee kujirto \$100 lot ka aan kugali karo waa 0.01 sax, haddaba imisa trade ayaan kugali karaa?

JWB: Lot size-ka kaaga soobaxa qaacidada aan kor ku xusnay waxaad u adeegsan kartaa I trade oo kaliya, taaso lamicno ah waxaad ku gali kartaa I trade, tusaale akawnka ey kujirto \$100 lot size kiisu waa 0.01, haddaba 0.01 lot ayaan kugalayaa I trade oo qura, trade kale haddii aan furo waxaad ogaataa in aan aniga gacanteyda isku dilay.

## **Haddaba Waxaa Jira Akawn loo soo ja-jabi karo lotka**

Tusaale akawnka ee kujirto \$200, lot size ka ugu badan ee la isticmaali karo waa 0.02, haddaba waxaa sameen karaa in aan sii qeybiyo (kala jabiyo) lot ka 0.02, waxaa samee karaa in aan 2 trade oo min 0.01 lot kugalo, sidaa awgeed anoo lot size kii la iigu talagalay dhaafin ayaan trade yadeeda uqeybiyay!

## **Akawnka ee kujirto \$1000 sidee ugu qeebin karaa trade yada lot size ka?**

Hagaag! Ugu horreyn lot size ka loogu talagalay akwnka ee kujirto \$1000 waa 0.10 lot [Isticmaal qaacidadii aan kor kusoo xusnay], Wuxaad sameen kartaa in aad 10 trade gasho adigoo kiiba u adeegsanaya 0.01 lot, maxaa yeelay markaas wadarta lot size kaagu markii la isku daro waa 0.10, Wuxaad Samee kartaa sidoo kale options badan sida in aad 2 trade oo min 0.05 lot aad ku gasho, ama 4 trade oo aad 3 kamid ah kugasho min 0.03,

## kan kalane aa ku gasho lot 0.01

**Lot Size:** Waa xaddiga lacageed oo kamid ah haraagaaga ee aad suuqa lagali karto the more lot size weyn aad isticmaasho waa the more profit/loss uu kugu fadhiyo per pip (ama halkii pip)

SHAXDAN HOOSE WAXAAD KAGA BOGAN KARTAA NUUCYADA EE UKALABAAXAAN LOT SIZE-KA IYO KIIBA INTA PIP OO PROFIT AMA LOSS KUGU FADHIYO

### NOOCYADA LOT SIZE-KA

Nooca	Lot	\$PerPip	10pip	20pip
Micro	0.01	\$ 0.10	\$ 1	\$ 2
	0.02	\$ 0.20	\$ 2	\$ 4
	0.03	\$ 0.30	\$ 3	\$ 6
	0.04	\$ 0.40	\$ 4	\$ 8
	0.05	\$ 0.50	\$ 5	\$ 10
	0.06	\$ 0.60	\$ 6	\$ 12
	0.07	\$ 0.70	\$ 7	\$ 14
	0.08	\$ 0.80	\$ 8	\$ 16
	0.09	\$ 0.90	\$ 9	\$ 18
Mini	0.10	\$ 1	\$ 10	\$ 20
	0.20	\$ 2	\$ 20	\$ 40
	0.30	\$ 3	\$ 30	\$ 60
	0.40	\$ 4	\$ 40	\$ 80
	0.50	\$ 5	\$ 50	\$ 100
	0.60	\$ 6	\$ 60	\$ 120
	0.70	\$ 7	\$ 70	\$ 140
	0.80	\$ 8	\$ 80	\$ 160
	0.90	\$ 9	\$ 90	\$ 180
Standard	1.0	\$ 10	\$ 100	\$ 200
	2.0	\$ 20	\$ 200	\$ 400
	3.0	\$ 30	\$ 300	\$ 600
	4.0	\$ 40	\$ 400	\$ 800
	5.0	\$ 50	\$ 500	\$ 1000
	6.0	\$ 60	\$ 600	\$ 1200
	7.0	\$ 70	\$ 700	\$ 1400
	8.0	\$ 80	\$ 800	\$ 1600
	9.0	\$ 90	\$ 900	\$ 1800
Prepared by:		Website:		
Somtech Academy		<a href="http://www.somtechnew.com">www.somtechnew.com</a>		
		+252617017428		

## Muhimmada Stop loss order!

STOP LOSS: waa dalab aan lagaarin kaasi oo lagu xiro trade ka si lacalla haddii suuqa uu nala aado jihadii aan ugalnay jihod kaduwan aanu khasaara ha inala tarax tagin, stop loss ka markii lagu xiro trade ka uma baahnid inaa ka welwesho khasaaro kabadan midka aad ogtahay aadna ugu talo gashay khasaare aan aheyn, waa dalab automatic ah (isaga is maamula) targetkii stop loss ka markii lagaaro si automatic ah ayuu suuqa kaaga saaraa, hawshaas waxaa qabaayo server-ka dulaalka aad isticmaasho.

### FAA'IIDOOYINKIISA WAXAA KAMID AH:

1. Khasaari meysid khasaaro kabadan inta aad ugu talogashay
2. Uma baahnid in aad ka welwesho trade ka stop loss ka leh
3. Waad kadaneesa kartaa tradeka, si kale uma baahnid maantoo dhan inaa isha ku heysa shaashada computerka ama taleefonkaaga
4. Wuxuu ka hortagaa khasaare laga baaqsan karay
5. Waa difaac ama ilaaliye hantidaada
6. Lacagta kugu jirta akwnka ayuu kuu tashiilaa ama kuu yar-yareeyaa

### CAWAAQIB XUMADA KA DHALAN KARTA HADDII AAD ISKA INDHA TIRTO AMA AAD ILAWDO STOP LOSS-KA!

1. Khasaare aadan fileyn
2. Wel-wel iyo shalaay
3. Suurto galnimada ah in akwnku uu kaa gubto adoon filaneyn
4. Khasaare Zaa'id ah

Sidaan wada ognahay cudurada qaar waxee leeyihiin talaal ama waxaa looga hortagaag talaal, sidoo kale forex markii lajoogo khasraaha waxaa looga hortagaa iyadoo la adeegsanayo Stop loss waa talaalka xakameynta khasaara ha.

# **WALIGAA HA GALIN TRADE BILAA STOP LOSS AH!**

**IMISA PIP OO STOP LOSS AH AYAAN KU XIRI KARAA TRADE YADA AAN GALO?**

Taasi waxee ku xirantahay hadba lacagta aad heesato inta ee la egtahay, tusaale akawnkaaga haddii ee kujirto lacag yar isticmaal stop loss yar oo u dhaxeeya 25-30 pip ugu badnaan, maxaa yeelay lacgtaada ma xamili karto stop loss badan, laakiin haddii lot size ka aad aad iyo aad uyareesato then stop loss badan waad xamili kareysaa oo saameen kuguma yeelanaayo waxaad adeegsan kartaa markaas 40-60 pip oo stop loss ah. Haddii akawnkaaga ee kujirto lacag fiican waxaa kugu latalinaya in aad isticmaasho stop loss dheer.

**MUHIIMADA EE LEEDAHAY IN AAD STOP LOSS KA XOOGA DHEEREESATO**

1. Mararka qaar inagoo ey inoo saxantahay jihada aan ugalmay suuqa ayaan haddii aan stop loss yar oo 20-30 pip ah ku xirno trade-ka waxaa dhacda inta badan in suuqu uu nagasoo taabto stop loss ka kadibna oo suuqa si toos ah u aado jihadii aan awal usaadaalinay, maxaa yeelay marwalbo suuqu wuxuu ubaahanyahay fursad uu ku ciyaaro, mana dooneyno in suuqa correction yar uu naga saaro, si eysan taasi kugu dhicin waxaa habboon in aad stop loss dheer isticmaasho ugu yaraan 50 pip cml.
2. Muhiimmada kale uu leeyahy ayaa ah waxaad ogaaneyesa in jihadii aad ugashay suuqa eysan kuu saxneen eena aheed in ad suuqa iskaga harto, haddii ad isticmaasho stop loss yar dee masaadaalin kartid in ey jihadaadu saxneed iyo inee qaldaneed, correction yar ayaa marwalbo suuqa kasaari doono

Dhalinyaro farabidan oo ka cabaadaya ayaan arkay oo leh trade yada aan

galo badanaa waxee igaaga dhacaan stop loss ka. Waxaa sabab u ah arrintaas stop loss aad uyar ayuu isticmaalaa qofkaas.

## HALKEE LA DHIGTAA STOP LOSS KA?

Badanaa Stop Loss ka waxaa la dhigtaa meel kasareysa trade SELL ah, ama meel ka hooseesa trade buy ah, goobta ugu fican ee ku habboon in aad stop loss-ka dhigatid waa structure-ka kugu dhaw. Sawirkan hoose eeg:



**Sawirka I-aad: Halka la dhigto stop loss-ka AUDUSD trade BUY ah**

Stop Loss ka waxaad dhigan kartaa meel walbo oo support hore ama resistance hore ahaa oo uu qiimaha kasoo kala fireeyay ama laga soo caliyay, sababta ey u fiicantahay in aad stop loss-ka dhigato meel uu qiimaha hadda kahor kasoo laabtay (ha ahaado support ama resistance) ayaa ah:

1. Haddii lajabiyo (Supporta ama resistance) waxaan dooneynaa inaanu isaga harno suuqa si aanu noola tarax tagin.
2. Waa meel ey adagtahay in uu qiimaha si sahlan kutago, taasoo ina siineysa fursad uu suuqu ku ciyaaro, waxeeyna xoojineysaa inaan ku guuleesano trade-ka.

## RISK REWARD RATIO

AKHRISTOW MA IS WEYDIISAA WALIGAA MUHIIMADA EE LEEDAHAY IN TRADE YADA AAD GASHO EY KU DHISNAADAAN (KU SALEYSNAADAAN) RISK REWAR RATIO?

Risk Reward Ratio: waa cabbirka isu dheeli tirka faa'iida iyo khasaaraha, waxaana loo qoraa sida tan I:I, I:2, I:3.

I:I = waxee kadhigantahay xaddiga faa'iidada aan raadinayo iyo xaddiga an halis (risk) galinayo waa iskumid

I:2 = waxee ka dhigantahay xaddiga faa'iidada aan raadinayo ha ahaado labo jibaarka xaddiga an halis (risk) galinayo

I:3 = waxee ka dhigantahay xaddiga faa'iidada aan raadinayo ha ahaado sadex jibaarka xaddiga an halis (risk) galinayo

### I:I RISK REWARD RATIO



Sawirka 2aad Risk Reward Ratio I:I AUDUSD

Waa risk reward ratio wanaagsan, laakiin kugu lama taliyeen, maxaa yeelay faa'iido iyo khasaaro same ah ma ahan wax u fiican dadka leh soomalida

oobadana akawno yar-yar leh 1000-5000\$, ugu yaraan waxaa wanaagsan in faa'iidaada ey ku laba jibaaranto inta aad halis galineyso si aad mustaqbalka faa'iido ugu dhameesato.

## WAXYAABAHA AANU U WANAAGSANEEN I:I RISK REWARD

1. Waa faa'iido iyo khasaare is la'eg uma fiicna mustaqbalka fog
2. Tusaale kasooqaad waxaad gashay maanta 4 trade oo ku saleysan I:I Risk Reward Ratio (Mid kasta oo kamid ah 4-ta trade waxaa ku xiran 50 pip oo stop loss ah, iyo 50 pip oo take profit ah), aa dhahno 2 trade oo kamid ah waa ku khasaartay meeshaas waxaa ku lumisay 100 pip sax, hadane 2 kale oo kamid ah 4-ta trade waad ku faa'iiday waxaadna kaheshay +100 pip, sidaa awgeed haddii lakala jaro inta pip aad khasaartay iyo inta pip aad faa'iiday waa 0 (Waayo 100-100= 0 pips), taaso ah jug-jug bartaada joog, wax mecno ah ee kusameysay malah.

Dadka akawnada waa-weyn leh iyagu saamee kuma yeelaneyso wey adeegsan karaan Risk Reward Ratio I:I maxaa yeelay waxeey heestaan equity badan oo kufilan cabsina kama qabaan in mudo gaaban gudaheed ey suuqa uga baxaan dadkaas badanaa saameen weyn kuma yeelato.

# I:2 RISK REWARD RATIO

+252617017428

AUTHOR: MUSTAFA YUSUF HUSSEIN MOHAMED

[HTTPS://WWW.SOMTECHNEW.COM](https://www.somtechnew.com)

©SOMTECH ACADEMY



## Sawirka 3aad Risk Reward Ratio 1:2 EURGBP

Kan waa mid kamid ah kuwa ugu fiican uguna caansan dhanka Reward Ratio, taaso la mecno ah Faa'iidada aan raadinayo ha la ekaato labo jibaarka inta aan qatar (risk) galinayo, waa doorasho fiican taasoo kusiineysa natiijo wax ku ool ah marka loo eego xaddiga aad riskiga galineyso, taaso kadhigan haddii khasaarahaagu iyo faa'iidadaadu bar-baro ku dhamaadaan weli adaa libinta (guusha) kaleh suuqa!

## HADDABA SIDEE UGA LEEYAHAY LIBINTA (GUUSHA)?

Kasoo qaad waxaan galay 2 trade oo kiiba ( $T_p=100$  pip, Stop loss = 50 pip) mid kamid ah waa ku faa'iiday, midna waa ku khasaaray!

## HADDABA AAN XISAABINO

Halka trade aan ku faa'iiday waxaan kaheystaa 100 pip, midkii aan ku khasaarayna waxaan ku waayay 50 pip, haddaba haddii lakala jaro (100-50 pip) waxaan still kawataa suuqa 50 pip oo profit ah anoo 1 trade ku faa'iiday 1 tarde-na ku khasaaray Amazing!

**BAL EEG SIDA EEY U AWOOD BADANTAHAY I:2 RISK REWARD RATIO** waayo anigoo I Win, I Loss ah ayaan still suuqa kawataa.

# I:3 RISK REWARD RATIO



## Sawirka 4aad Risk Reward Ratio 1:3 EURGBP

Sida sawirka kore kaaga muuqaata, Wuxaa arki kartaa in beegsigeena faa'iido (Take profit target) uu Saddex jibaar kabadanyahay marka loo eego inta aan Risk galeyno, taaso kadhigan 50 pip ayaan risk galinaya si aan u helo 150 pip oo faa'iido ah, taaso run ahaantii ah Risk Reward Ratio dahabi ah oo aan laheli karin, abaalmarintiisana eey aad iyo aad usareyso, waa midka aan aniga kuula talinlahaa ka qoraa ahaan in kulli trade-yadaada ey ku saleysnaadaan Risk Ratio nuucaan ah 1:3, si jillaabashadaada faa'iido ey gebi ahaanba u tir-tirto khasaaraha yar ee kusoogaara.

## HALKAN EEG ABAALMARINTIISA!

Kasoo qaad waxaan galay 2 trade oo kiiba ey kuxirantahay (50 pip stop loss ah, iyo 150 pip oo take profit ah), haddaba aan iska dhahno 2-daas tarde I kamid ah waan ku khasaaray, I-ka kalane waa ku faa'iiday simply!

## MARKA

I trade = 150 pip profit

I trade -50 pip loss

:- 150-50 = 100Pips Amazing! Suuqa waxaa kawadanaa 100 pip oo profit ah inagoo kaliya midna ku faa'iidanay midna ku khasaarnay.

## OVER TRADING

### WAA MAXAY OVER TRADING?

Over Trading: waa in aad halmar iskadaba furto (gasho) trade-yo aad ufarabidan, arinkan waxaa laga yaabaa maqalkiisa in uu kugu cusubyahay laakiin badanaa haddaa Soomaali nahay waa sameenaa, waana mid kamid ah waxyaabaha sababa in uu qofka si fudud iyo mudo kooban uu akawnkiisa uga qarxo, waxa uu ka halis badanyahay in aad Lot weyn oo aan akawnkaaga uqalmin ku gasho trade! Waxa uu ka halis badanyahay inaad ilawdo Stop loss-ka, Wuxuu ka halis badanyahay in trade-yadaada eesan ku saleesneen waxa loo yaqaan Risk Reward Ratio, waa mid kamid ah waxyaabaha ugu halista badan ee naga guba akwnadeena hadaa Soomaali Maxamed nahay, waa qodob run ahaantii inta badan aan looga hadlin Forex-ka halistiisuna ey zaa'id tahay.

### SIDEE AYUU HALISTA INTAA LA'EG ULEEYAHAY OVER-TRADING?

Qaladaadka ugu badan aan galno haddaan Soomaali nahay waxaa weeye, Signal ayaan arkeena horey ayaan ka galeenaa, qolo kale oo signal soo dirtay ayaan haddane arkeenaa hore ayaan ka galeenaa, qolo kale ayaan arkeenaa oo hadana signal soo direyso hore ayaan ka galeenaa, saaxiibkeen ayaa na leh “war nio EURUSD fursad fiican oo SELL ah kajirto ee gal” hore ayaan kagaleenaa, waxaa laga yaabaa in ey intaas inoo sii dheertahay in trade-yadeenu aanu ku xirnayn Stop Loss, waxaa lagasii yaabaa in aanu ku galno Lot Weyn, Waxaa laga yaaba in aanu ogeyn xitaa trade yada aan galeeno target kooda inta pip ee stop loss ah, iyo inta pip ee take profit ah, waxaa laga yaabaa in trade ka aa qaadaneenu uusan ku saleysneen Risk Reward Ratio macquul ah, oqodobadaasoo dhan oo isbiirsada ama isugu kaa darsama ayaa holciya horta akwnadeena meel ku qoro waa qodob

## SI AAN OVER TRADING USAMEEN MAXAAN SAMEEYAA?

Si aad uga badbaado dhagarta Over trading waxaa muhiim ah in aad qodobadan soo socda ku dhaganaatid oo aadan waligaa kafuqin:-

1. Waligaa Halmar Ha Wada Furin Trade-yo Badan (Ugu yaraan I trade ama 2 trade hakuu furnaadaan adigoo adeegsanaya Lot-ka saxda ah ee loogu talogalay akawnkaaga)
2. Haddii ey hore trade-yo kugu furnaayeen hagalin mid dambe fursad kasta oo laga sheego waayo lacagtaada adigaa masuul ka ah, masuul kama ah qofka kuleh trade-kaas ayaa fursad kajirtee gal
3. Haddii ee noqoto qasab in aad trade-yo farabadan halmar gasho fadlan qiimeey lacagta kugu jirta ee akwnkaaga, Lot-ka saxda ah ee loogu talogalay u adeegso adigoo ku dabaqaya qaacidadii aan kor kusoo xusnay, dabadeedna haddii Lot-kaagu uqaybsami karo trade-yo badan u kala qeybi adigoon ka badineen Lotka loogu talogalay akawnkaaga
4. Markii eey target-kooda kuu gaaraan (SL ama TP ey kudhacaan) trade-yadii kuu furnaa kadib kafikir in aad trade kale gasho

## HADDII AAN OVER-TRADING SAMEEYO MAXAA DHACAAYO?

1. Margin-kaaga wuxuu gaarayaa xadkii loogu talogalay inuusan dhaafin
2. Margin Level-kaaga aad buu hoos ugu dhacayaa waxaa laga yaaba mararka qaar inuu gaaro 30-50% waana marxalada ugu daran (STOP OUT) dulaalka wuxuu kusoodirayaa Margin Call (oo ah codsi kasocda dulaalka uu kaaga dalbanayo in aad lacag dheeraad ah kusoo shubto akawnka si laguugu fasaxo in uu kuu sii furnaado trade-ka ugu badan ee khasaara ha kugu haayo) wuxuuna kaa xirayaa si automatic ah trade-ka ugu badan ee khasaara ha kugu haaya haddii aadan lacag dheeri ah deposit gareyn!

## MUHIIM!

Marka aan ku leeyahay ha galin trade-yo farabadan kama dhigno in aadan gali karin Twin trade, laakin twin trade waxaa uu leeyahay shuruudo ugooni ah oo xalaaleynaya in aad furi karto,

## SHURUUDAHA TWIN TRADE WAXAA KAMID AH

- I. In aad trade ka furto markii aad aragto trade-kii kuu furnaa oo 10-15 pip u dhaqaaqay jihadii aad ugashay

## **Hadaf Faa'iido (TARGET PLAN)**

Arinka kale ee sababa in aanu si fudud iyo mudo kooban ku khasaarno FOREX waxaa kamid ah in aanu iska galno suuqa iyadoo oo eysan inoo caddeyn faa'iidada aan ka dooneeno suuqa Maalintaas, waan iska trade gareynaa oo kaliya, nooma xisaabsana intaan suuqa kala tegi karno maanta, maalmihii lasoo dhaafay intaan faa'iidnay iyo intaan khasaarnay, taasi waa mid kamid ah qaladaadka ugu waaween aan galno, ogsoonow Akawnkaaga waa yacni business aad leedahay oo kale, kawaran haddii aadan gara karin business-kaaga inta kusoo gasha iyo inta kaabaxda soo qorsho-xumo miyaanu aheen iyo dayacaad aan daah saarneen.

### **SI AAD HADAFKAAGA FAA'IIDO U XAQIJIISO RAAC QODOBADAN**

1. Yeelo daily target, waa inee kuu caddahay inta aadan maalintaas trade galin hadafkaaga faa'iido, is-weydiimisa Dollar oo faa'iido ah ayaad rabtaa in aad suuqa maalintaas kala tagto, ma waxaad dooneysaa in aad maalintaas faa'iido \$10, \$100, ama \$1000-Hadba inta Akwnkaaga kujirta iyo tabartaada ey la'egtahay
2. Daily target-kaaga (Faa'iidadaada maalinlaha ah) markaa xaqiijiiso ku dhegnaaw waligaa oo hakafuqin, ha joojin inaad trade gareyso ilaa aad faa'iida beegsigaaga gaarto maalintaas, sidoo kale waxaa lagaa doonayaa in aad suuqa iskaga baxdo markii aad xaqiijiiso hadafkaaga.

### **MAXEEY KAA CAAWINEYSAA IN AAD DAILY TARGET YEELATO?**

1. Kuma saqajaameesid suuqa mar haddii aad gaarto target-kaaga, taasi waxeey kaa caawineysaa in aad ku ekaato target-kaaga oo aad maalinkaas kanasato suuqa buuqiisa maadama hadafkaaga aad xaqiijisay, haddii aan sii yara faahfaahiyo qodobkan, “qof waxaad arkeysaa maanta galinkii hore faa'iiday ama qabtay faa'iido dhan \$50, dabadeedna caawa oo kale markii lagaaro faa'iidadii 50-ka dollar uu

Qabtay mahaayo caawa uu wuxuu kataaganyahay 0\$, ama isaaba khasaaro kujiro oo wax lagu leeyahay” In aad hadaf yeelato waxeey kaa saacideysaa in aadan iskadaba meeraysan oo marba meel ku dhicin

2. Suuqa kama Baxeysid oo waad udagaalameysaa illaa aad kaxaqijiso daily target-kaaga, waxaad rafataba waxaad isku dayi doontaa in aad mar uun xaqijiso hadafkaaga maalinlaha ah

## ISXISAABI!

Waxaan kawadaa ahaaw qof xisaabtama oo ka warhaaya waxa soo gala iyo waxa kabaxa, intaa faa’iido iyo inta khasaarto hakuu diiwaan gashnaadaan, samee weekly report, iyo monthly report.

## MUHIIMMADA EE LEEDAHAY INAA XISAABTAMTO

1. Waxaad ogaaneysaa wada aad kusocoto, yacni in aad wadad faa’iidada hayso iyo in aad wadada khasaaraha heyso ayaad kala ogaaneysaa markaa xisaabiso inta bishaan kusoo gashay iyo inta kaa baxday
2. Haddii aad ogaato in aad wadada guuldarada heyso waxeey fursad kuu siineysaa in aad wax ka bedesho habka aad u trade gareyso, taasoo dib kugu soo celinkarta wadada guusha

# KHIYAANADA SHIRKADHA SOO BADANAYA EE MAALGELINTA

Madoonaayo in aan qolo gaar ah waxka sheego waayo xirfada qoraanimada kamid maaha in aad qalinkaaga ku dacaayadeeso qolo gaar ah oo aad dhaliilsantahay, hase ahaataa waxaa jiro waxyaabo badan oo aan indhaha laga qarsan karin oo ubaahan in banaanka lakeeno muhiimna ey tahay in bulshada ey ogaato waxyaabahaas waxaa kamid ah in qaar kamid ah shirkadha maalgalinta kashaqeeya ey dad badan oo Soomaaliyeed lacago gaaraya Malaayin Dollar ka lumiyeen, iyagana iska lumiyeen, dadkii udhiibtayna ey ka lumiyeen, madoonayo inaan sii guda galo qaabka ey u lumiyaa waayo taas mawduuca ayeey iga saareysaa, hase ahaatee waa arin jirta oo dhalinyaro farabadan oo hammi lahaa lacagahooda ey ku waayeen iyagoo loo ballan qaaday faa'iido inee heli doonaan, dabadeedna inta lacagtoodii (Lafahoodii) dhawr bil qeyb kamid ah laga siiyay haddane bishii xigtay lagu yiri lacagtaadii wey khasaartay, ama qaarkood lacagtoodii lala tegay oo aaney warba uheyn meesha lala aaday iyo waxa lagu qabtay, qaar kamid ah dadka ladhacay ayaa taleefonada laga damsadey waana lagu dhageestaa, qaar badan oo kamid ahna waxaa lagu maaweeliyaa in bisha dambe ama dhawr bil kadib lacagahooda dib loogu bilaawi doono (Laakiin wax kajira malaha balanqaadkaas), qaarbaa markee damcaan in ey lafahooda labaxaan maadaama aanu meesha faa'iido kajirin-Waxaa lagu yiraahdaa lacagtaadi wey khasaartay, ama waxaa la ballamiyaa waqt kale si qofkaas loo lug-gooyo ugana quusto lafihiisa, Dadka qaar ayaa markii ey is-dhahaan faa'iidadaada udoono qoladii lacagta kuu maalgalisay waxeey lakulmaan xafiiskii oo xiran oo lagu kala tegay.

**XASUUSIN!**

Waxaa Laga yaabaa in ey jiraan Shirkado si xalaal ah oo daacad ah

Ushaqeeysta, sidaa awgeed waxaan dooneynaa in aad ufahamto arrintan in ey quseyso kuwa danaha gaarka ah kaleh lacagaha ey kasoo uruuriyan dad-weynaha.

HADDABA SIDEE UGA BADBAADI KARTAA IN AAD UGACAN GASHO QOLOOYINKA AAN KASOO HADLAY, MUXUUSA YAHAY NUXURKA KUJIRA IN AAN ARINTAN OO MAWDUUCA KABAXSAN BUUGA AAN UGA HADLO?

Nuxurka aan kaleeyahay sheekadan ayaa ah “WALIGAA HA UDHIIBAN LACAGTAADA QOF KULEH WAAN KUGU SHAQEYNAYAA” War adiga inta cilmigii baratid, waala bara karaahe maad ku shaqeysatid, ma jiis ayaa tahay mise cidda aad ku aamineeso lacagta waxyi ahaan muu ugu soodagay Cilmiga FOREX?

Waxaan hubaa kumanaanka Dollar aad u dhiibaneysid shirkadaha maalgalinta inaad adigu faa’ido kasoo saari laheed haddii aad baran laheed Xirfadan waqtii iyo Juhdina aad gali laheed

XITAA HADDII LACAGTAADA AAD GACANTAADA KU GUBTO WAA WAX LOO QAATEEN AH

Qiyaas, xanuunka ey leedahay lacag aad qof udhiibatay kugu yiri waan kugu shaqeynaa dabadeedna la dhuuntay lacagtaadii!

Haddii aad dooneysida in aad Barato qaabkii aad ugu shaqeysan laheed Lacagtaada adigoon cidna udhiiban Fadlan waxaa kuu heynaa Koorssooyin Af-soomaali kubaxa oo cilmigii laga baran karo-Fadlan haddii aad daneyneyso barashada Forex webkan iska diiwaangali hadda

# Dhagarta Qolada Sameysa Account Management

Qoladaan waa qolada ugu daran ee si fudud ugu ciyarta hantida uu leeyahay shaqsi doonaya in lacagliisa loogu shaqeeyo, waxeey kadaranyihiin qolada sameysa maalgashiga tooska ah waayo qoladaas xafiis iyo meel loo raaco ayee leeyihiin.

## WAA MAXAY HORTA ACCOUNT MANAGEMENT

Waa Maalgashi dadban, shuruudhiisa waxaa kamid ah:

1. Waa in aad adiga marka hore koonto ganacsi kasoofuratid dulaalka (**REAL ACCOUNT**)
2. Kadib markaa lacag kushabatid ayaad Meta trader 4 credentials-kaaga (MT4 ID, SERVER NAME iyo PASSWORD-KA) lawadaageysa Account Manager-ka
3. Wuxuu kuu la heshiinayaa Faa'iido qeybsi boqolkiiba in kamid ah faa'iidada soo baxda Isbuucii, ama Bishii

## KADIB MAXAA DHACA?

Ugu horreyn wuxuu sameenayaa in uu akawnkaaga ugu trade gareeyo si maxaa kaagalay ah ama si Waali ah, Wuxuu isticmaalayaa Lot Size aad uweyn, Stop loss kuma xiraayo badanaa trade-yada, wuxuu sameenaa dhamaan wax walbo ee keeni karo in akwnka uu si deg-deg ah ku gubto, UJEEDIISA UGU WEYN UU LEEYAHAY WAXAA WAAYE HADDII SI NASIIB AH HALMAR UGU TOOSTO OO FAA'IIDO BADAN QABTO WUXUU DOONAYAA IN UU FAA'IIDADAAS KULA QEYBSADO, Hadii uu kaa Gubana Akawnka KHALAAS MARKAAS AYAA ISKUGU KIIN DAMBEYSO

## **HALKEE KA HELI KARAA SIGNALS TAYO LEH OO LA HUBO IYO TABABAR KUSAABSAN BARASHADA FOREX?**

Somtech Academy oo aan anigoo ah Qoraaga Buugan Masuul ka ahay waxaanu bixinaa Signals VIP ah oo lahuba 90% Accuracy leh, Signals-ka waxaa si toos ah usoodira aniga oo ah qoraaga buuggan run ahaantiina maadaama aan ahay waayo-arag suuqaan muddo dheere kusoo-dhexjiray waxeey iisuurta galisay in aan dhalinayarad Soomaaliyeed ii team-keega kamid ah siiyo high quality signals oo aad kamahdi doonto haddii aad team-keena kamid Noqoto! **FAAHFAAHIN DHEERI AH OO KUSAABSAN QAABKA AAD KUHELI KARTO SIGNALS-KA AAN BIXINO WAXAAD SOO WICI KARTAA TALEEFON LAMBARKAAN** +252617017428 ama Soo Booqo barta aan ku leenahay Internetka ee <http://www.somtechnew.com>

Haddii aad dooneysida in aad Barato qaabkii aad ugu shaqeysan laheed Lacagtaada adigoon cidna udhiiban Fadlan waxaa kuu heynaa Koorsooyin Af-soomaali kubaxa oo cilmiigii laga baran karo-Fadlan haddii aad daneyneyso barashada Forex webkan iska diiwaangali hadda

[HTTPS://WWW.SOMTECHNEW.COM](https://WWW.SOMTECHNEW.COM) AMA WAC +252617017428

## **ISTICMAAL LAVERAGE MACQUUL AH**

Akhriste ma ogtahay in Lverage-ka aad isticmaasho uu saameen ku leeyaha faa'iida tira badan aad sameeneeso ama khasaaraha zaa'idka ah eekugu dhaco.

### **WAA MAXAY LAVERAGE?**

Dad badan oo Soomaali aha waxey ku fasiraan ama uyaqaanaan Lverage-ka inuu yahay Lacag uu barookarka aamaahiyo maalgashtaha, si uu gancsiyo kabaden inta ey lacagiisa yar ugoysa ugu galo! Hase ahaatee fahamka nuucaas ah waa khalad, majirto lacag uu si toos ah iyo si dadbanba uu kuu amaahinayo dulaalka, Lverage waa awood siin sida saxda ah, dulaalka wuxuu awood kuu siinaya in aad gasho heshiisyo (delas/trades) farabaden oo aadan haddii aadan iyaada la'aantii isticmaali laheen aaney kuu suurto gasheen in aad deals farabaden?

### **SIDEE AYUU SAAMEEN UGU LEEYAHAY PROFIT/LOSS**

Mar walbo aad badsato lverage-ka, waxaad ogaataa in uu dulaalka kuu fasaxayo in aad trade-yo aad ufarbadan gasho, Lot weyna aad isticmaasho, Labada qdob ee kala ah TRADE-YO FARABADAN, iyo LOT WEYN waa labo qdob oo saameen aan wanaagsaneen ku sababa qofka ganacsadaha aha, waxeena uhorseedaan khasaaro deg-deg ah, dhanka kale haddii aad adigoo trade-yo farabdan galaya haddana Lot Weyn isticmaalay Lverage-ka dartiis waxaad qaban kartaa faa'iido waali ah, hase ahaatee ma hubno in aan faa'iidi doono sidaa awgeed waxaa inoo wanaagsan in aanu Lverage-ka badsanin si aan suuqa muddo dheer ugashaqeysano khasaare farabadanne oo nagu imaan lahaa aan uga badbaadno

### **LAVERAGE BADAN IYO LAVERAGE YAR IN LA ISTICMAALO KEEBA FIICAN KEEBAASE RISK MANGAMENTIGA U WNAAGSAN**

Lverage-ka yar tusaale adeegso (1:50, 1:100, Ugu badnaan 1:200)

# QISO GAABAN OO IGA QABSATAY FOREX OO DHIIRIGELIN KUU NOQON KARTA?


Aniga oo ah Qoraaga Buuggan Mustaf Yusuf Hussein Mohamed, waxaan Forex bilaaway bartamihii 06-August-2019-kii, Xilligaa forex Soomaaliya qiimo weyn iyo xiiso badan ayuu kalahaa guud ahaan dalka, dadkana aad bey u raadi jireen in ey bartaan kunasoobiiraan, Yar saaxiibkey ah ayaa igula taliyay wuxuuna igu yiri anigoo shaqo la'aan iheyso "Nio Mustafow waxaa jira business online ah oo aad lacag farabadan ku kasban karto haddii aad kushaqeysato" Wuxuu ku iri waa business ceynkee ah wuxuu igu yiri waxaa la dhahaa "FOREX" waa sarifka lacagaha qaab online ah, markaas baan waxaan ku iri "Sxb naga daa lacago la isu sarrifo faa'iido fiican lagama soo saari karee ee nio naga daa business kale oo lahubo faa'iidano leh iisheeg" yarkii saaxiibkeey ahaa wuu ku adkeystay in FOREX lacag farabadan laga soo saari karo uuna yahay business jira faa'iidana leh, Wuxuu maalma kadib isiiyay cashiro kusaabsan FOREX oo basic ah (Waan umahadcelinaya Isaga Mana doonayo in aan magiciisa hada buuggan kuxuso) kadib cashiradii markii aan 2 isbuuc daa-daawaday waxaa igu dhashay xiiso iyo hammi badan oo ah inaa suuqan FOREX bilaawo aana barto, Muddo kudhawaad bil ah kadib ayaan bilaabay in aan Furto REAL ACCOUNT anigoon cilmigii sifiucan aanan weli ufahmin iyo khataraha ku geedaaman, Kadib bartamihii bishii August 2019-kii ayaan furtay trading account waxaana kafurtay dulaalka Exprimus, Lacagtii aan ku bilaaway waxeey aheed \$150 oo kaliya sida kamuuqata sawirka hoose ee akwnkeega;

The screenshot shows the FXPRIMUS trading platform's user dashboard. At the top, there is a header with the FXPRIMUS logo and the text "The Safest Place To Trade". Below the header are three buttons: "Profile", "Support", and "Logout". On the left side, there is a sidebar with the following menu items: "Dashboard" (selected), "Promotions" (highlighted in blue), "Fund Account", "Bitcoin", and "Trading Tools". The main content area has a "Dashboard" title and a user profile section for "Mustaf Yusuf Hussein" (User ID: 39703573) showing "Individual Account" and "Pending" status. It also displays "MT4 ID: 4516334", "Close Balance(Delayed 5 Minutes): 150.00", and "Deposit Currency: USD", "Leverage: 300", and "Variable Sp...". A "Notification" box is visible, advertising "The FXPRIMUS PAMM Investment Service" with the text "Are you a confident trader?" and an image of hands holding a globe.

WAA LACAGTA AAN DEPOSIT GAREEYAY AKWNKEEGA REAL-KA AH AUGHUST 2019

Sida kaaga muuqata Sawirka kore lacagta aan ku shubtay berigaas waxee aheed \$150, sawirkaan waxaan qaaday 06-Aughust-2019, mar uu nin kale oo saaxiibkey ah iga caawinayeey berigaas Deposit-ka maadaama berigaas ey ugu adkeed inaa lacag kushubto, sawirkaana berigaas isaga ayaan udiray si aan ugu sheego in aan ku guuleystay in aan akwnkii lacag kushubay, sidoo kale akawnka sida kaaga muuqata xilliga aan sawirka qadaayay Akawnkeega wuxuu kujiray Pending iyadoo oo ey

dukumintiyadii qaar iga kala dhimanyihiin ayaan Deposit Sameeyay, xiiso aan uqabay iyo fudeed darteed.



Sawirka 4aad Real Account

History

All symbols

Profit: 14.10

Balance: 14.10

Trade Details	Date
USDCAD, buy 0.05 1.32930 → 1.32998	2019.08.07 09:51
CADJPY, sell 0.02 79.886 → 79.887	2019.08.07 10:34
GBPUSD, sell 0.02 1.21744 → 1.21642	2019.08.07 11:04
CADCHF, buy 0.02 0.73659 → 0.73637	2019.08.07 12:21
EURUSD, sell 0.03 1.11841 → 1.11824	2019.08.07 13:37
NZDUSD, buy 0.02 0.64425 → 0.64301	2019.08.07 14:33
CADJPY, sell 0.05 79.942 → 79.941	2019.08.07 13:50

Up arrow, candlestick chart, trend line, blue square icon, calendar, speech bubble

Sawirka 5aad Intii aan Faa'iiday Maalintii ugu horreysay

Sida ka muuqata Sawirka kore maalinteedii koowaad anigoo isleh suuqa waxba kama faa'iidi doontid waad khasaari doontaa-ayuu suuqa si wanaagsan isoo dhaweeeyay waxaana ka faa'iiday lacag dhan \$14.10, midna kudarsoo Lot-ka aan isticmaalay iyo Lacagta akawnka iigu jirto maahan wax isu qalma, trade-kii koowaad waxaan kugalay lot 0.05 oo loogu talogalay akawn ee kujirto \$500 iyo kabadan, sidoo kale sida kamuuqata sawirka trade-yada waxaan galay waqtio isu dhaw oo waxaa udhaxeysa I saac kulligood, taasoo kadhigan is aan sameeyay Over Trading, stop loss hal trade oo kaliya ayaan kuxiray sida sawirka kamuuqata wuxuuna ahay I pip kkkk, sidoo kale waxaa kamuuqata trade-yada in aanan siin waqtii ey kusocdaan oo iskumarkiiba markee wax yar dhaqaaqeen hore ayaan kaxiray

## AAN SII WADO SHEEKADA

Kadib anigoo sidaa kusocda oo aan bilaa Risk management ah waxaan lot weyn isticmaalaba oo aan Stop loss la'aan trade gareeyaba waxaa iisuurtogashay in aan 3 isbuuc gudahood oo ah 21 Maalin KADIB akawnkii aan ku gaarsiiyay lacag dhan \$1166.52 eeg sawirka hoose:



Sawirka kore maaney ii suurtagaleen in aan idin lawadaago laakin waxaan ka dhex helay Video aan kaduubtay mar aan ZOOM live ah kujiray, kadib ayaan Screen Shot kaqaatay, Sida ka muuqata Sawirka kore maalinteedii 22-aad ee bisha Aughust 2019 Balance ga iigu jira akawnka waa \$1166.52, marka loo fiirsho lacagtii aan akawnka ku bilaaway oo aheed 150\$ iyo mudada gaaban aan intaa ku gaarsiiyay waxeey ahaayeen arrimo layaab leh oo aanu qofwalba si fudud ku aamini kareyn, hase ahaatee FOREX waa ka suurtogal oo waxaa kuu ogolaanaya in aad trade-yo badan iyo Lot size waali ah isticmaasho wax loo yaqaan Lverage (Xilligaas Lverage-keegu wuxuu ahay 1:300), haddii aan sawirka kore mdi-mid usii dul istaago, horta sida sawirka kaaga muuqata qeybta ugu sareysa dhanka bidix akawnka waa REAL ACCOUNT, (kor dhanka bidix waxaa ku oqrar MT4 Id, SERVER NAME-ka), waxaad kaloo kudareemeyso in uu isla akwnkii yahay dib usoo eeg Sawirka 4-aad, wey isleeyihiin oo waa isku mid hadaa isu fiiriso MT4 Id-ga labada sawir, sidoo kale sawirka waxaad ka arki kartaa in aan dhanka hoose ka calaamadeeyay 4 qeeb, qeybta koowaad aan ku calaamadeeyay Summada gbuluugga waxaa ku qoran waqtiga aan furay trade-yada aan kujiray waqtigaas taaso ah 22 Aughust-2019, Sidoo kale summada gaduudan meesha aan ku calaamadeeyay waxaa ka muuqda lot size-ka aan uga jiro trade-yadii ii furnaa maalinkaas, oo aad ka arki karto in LOT QEYRU MACQUUL AH In aan adeegsaday berigaa taaso sababtay in markii dambe dhulka ey ilagasho oo akwnkii dhan gubto-Sida uu akawnka igaaga gubtay dib ayaan ka faahfaahin doonaa-Dhanka kale summada cagaaran qeybta aan ku calaamadeeyay waxeey muujineysaa Nooca Trade aan kujiray xilligaas siiba Lacagta GBPNZD oo aan uga jiro Lot Waali ah taasoo ugu dambeyn akawnkeega gubi doonta, sidoo kale meesha aan ku calaamadeeyay Sumadda Basaliga ah waxeey sheegayaan faa'iido/khasaaro inta aan kujiray xilligaas-sida kaaga muuqatana waxaa kujira khasaaro dhan Total 136\$, haddaan bartaa iskaga xiri lahaa saacaan maan qasaareen akawnkeegana ma gubteen-laakiin waxwalbo xag alle ayee ka qornaayeen-

Qadartuna inaa kusabarto waa rukni kamid ah arkaanta limaanka., kaaga sii daran sida sawirka ka muuqata trade-yada iifuran oo dhan hal kamid ah Stop loss iiguma xirna anoo lot-ka aad aragtay uga jira-Markii wax lagula maaganyahay waxwalbo waa lagu illaawsiiinayaa Cajiib qadarta Alle!

## AAN SII WADO SHEEKADA!

Iyadoo oo ey waxwalbo halkaas iimarayaan waan xasuustaa waagas waxaan kujiray LIVE ZOOM oo kusaabsanaa Falanqeyneta Suuqa anoo aad u farxsanaa isuna heysta nin meel fiican Forex kagaaray wadadii guushana cagta saaray ayaan Internetka iska xiray hawlaheega kale ee Addunyana iska raacday AYAAN WAXAAN DAMCAY GOOR EY KU BEEGNEED SALAADA MAQRIB anoo isdhahaaya fiiri bal trade-yadii aad hadaaye gashay halkee kuu maraayaan ayaan waxaan kusoo waabariistay akawnkii ooba waxyar kujiraan wax aan dhammeen boqol iyo xoogaa Dollar, trade-yadii ii furnaa oo dhanna uu barookarka igu xiray khasaarihi, KADIB MA QIYAAKI KARO SIDA AAN ISU BEDELAY, MADAX AYAA I XANUUNAY, AADNA WAAN UDHIDIDAY, Anigoo rumeysa la' sida khasaaraha intaa la'eg iiso gaareen, Muxuu ii taraa wel-wel iyo calaacal, markaas ayaan mar nafteeda eedeeyaa oo aan fikiraa, waxaan is weydiiyay war inkaar qabe asxan maxaad 500\$ Withdraw ugu samee weysay markii ey Kunka Dollar kabaden akwnka kugu jirtay, Lacagtaas ama PAIR-ka sidan iigalay wuxuu ahaa GBPNZD waligeey ma ilaawo, Twin trade ayaan uga jiray oo wadarta guud lot-sizeka markii la'isku daraa la ekaa 1.50 GBPNZD oo qura! 2-da trade mid waxaan ku waayay lacag kabaden \$800, midna waxaa ku waayay lacag kabaden \$200 GBPNZD, suuqa waxaan ugalay berigaas SELL waan xasuustaa hase ahaate 90 pip kabaden ayuu ila aaday jihada BUY ah, ugu yaraan xitaa haddii aan usameen lahaa Stop Loss khasaaraha intaan waan kayaraa lahaa sidaan aaminsanahay balse wixii kuu qoran cidna kaama celinkarto!

Waxaa jirtay markaa in aan Withdraw Kusameeyay lacag 180\$ oo aan doonayey in aan taleefon fiican kugato kahor intaanu akwnka iga guban, kadib markii lacagta iga gubatay (Kunkii Dollar) ayaan waxaan soo celiyay 180-kii aan labaxay waxaana kudaray lacag kale oo boqol iyo xoogaa aheed oo kasoo hartay akwnkii gubtay, waxeey iinoqotay total adi lcg kudhaw 300\$, waan ku trade gareeyay haddana waa gubay, oo waa kadhexbaxay saddexdii boqol muddo isbuuc ah gudaheed anigoo isticmaalaayay risk management la'aantii aan kugubay Kunkii Dollar ee hore, illeen waxaan doonayay in aan ciyoow soo caliyo lacagtii aan gubay taaso igu dhiirigalisay in aan Lot Size weyn isticmaalo ugu dambeynna waan gubay lacagtii xigtay oo Saddexda boqol oo Dollar aheed, meeshaas waxaa ku waayay taleefon aan doonayay in aan gato iyo lacagi kaleba, then aad baan uga niyad jabay suuqa oo waxaan go'aansaday in aan suuqa dhan iskaga baxo maadaama aan dhawr jeer hore ku khasaaray! FOREX oo dhan muddo 5 bil ah maan fiirin oo waan iskaga baxay anigoo careysan aadna uniyad jabsan.

## MUDDO 5 BIL AH KADIB MAXAA IQABSADAY HADANE

Waxaan uruuriyay lacago aan kasooqaaday dad kala duwan oo ehel iyo asxaabba ii ahaa oo gaareysa \$600, waxaan dib ugu soo noqday FOREX aniguu maankeega kuhaaya in FOREX horey lacago farabadan ugu soo khasaariyay, waxaan trade-gareeyaba ugu dambeyn intaanu dhamaan 1 Bil ayaan lacagtii kale ee Lexda Boqol aheed mar Saddexaad gubay, bal maxaa iidaaday qaladaadkii hore in aan cashir lama ilaawaan ah kabarto? Maxaan khaladaadkii aan beri dhaweed galay ugu laa-laabanaa? Nasiib darro meysan dhicin!

## KADIB MAXAAN SAMEEYAY!

- Waan xisaabtamay horta oo waxaan xisaabiyay intaan khasaaray
- Waxaan warqad yar oo raf ah ku qortay dhammaan qodobadii ii horseeday in aan ku khasaaro FOREX iyo sababihii kadambeeyay
- Waxaan dib ubaaray macluumaad dheeri ah oo kusaabsan FOREX, iyo talooyin kusaabsan Maamulka Halista iyo sida khasaaraha la iskaga ilaaliyo loogana hortago
- Waxaan su'aalo weydiiyay oo wareestay rag suuqaan iiga horeeyay faa'iido fiicana kasameeyay, badankood waxeey ii sheegeen in ey soomareen arinta aniga iqabsatay oo kale, anigu Kun Dollar baan gubaye qaarbaa ii sheegay iney kumanaan khasaareen, arintaas niyada ayeey ii qaboojisay oo aniga ayaaba noqday "ha iska sheegin" waxee taasi igu dhiiri galisay anigoo og jabkii aan soo maray in aan haddana weli kaquusaan suuqan FOREX illaa aan kalahaado Libinta (Guusha) illaa aan ka noqdo PROFESSIONAL TRADER, niyadda ayaa la ii dhisay oo talooyin farabadan ayee isiiyeen iyo farsamooyin alx maanta waan ku faa'iiday

WAXAAN MAANTA ALLE UGA MAHADCELAA IN AAN AKWN GUBIN oo aan aad iyo aad utaxaddaro marwalbo, xisaabtamana.

ALX MAANTA WAXAAN KAJOOGAA HEER MACQUUL AH  
WALLOW EY WAX II DHAMANYIHIIN

## **GABO-GABO IYO GUNAANAD**

1. Aamin hora waxwalbo oo kugu dhacay in ey xag alle ka qornaayeen
2. Marnaba haka quusan hana kaniyadjabin FOREX, nimaan kufin makaco ayeeey Soomaalidu hore ugu maahmaahday, waxwalbo oo kumitidana (ku adkeysato) guul ayaa kagaaree guushaas mid dhaw iyo mid fogba wey noqon kartaa
3. Marka labaad iskuday in aad kataxadarto qodobadii aan soo xusnayoo kala ah:
  - a. Kataxadar Lot sizeka
  - b. Stop loss ha ilaawin
  - c. Risk Reward Ratio ku saleey trade-yadaada
  - d. Iska ilaali Over trading
  - e. Kataxadar Lverage-ka aad dooraneyso
  - f. Lahaaw Daily target
  - g. Lacagtaada cid kal ha udhiiban si ey kuugu shaqeyso
  - h. Waxkabaro dadka kaaga khibrada badan suuqa FOREX
  - i. Wax cusub inaa barato raadi

# XOGO MUHIIM AH

Haddii aad dooneyso Anigoo ah Qoraaga buuggan in aad khibradeeda ka faa'iideesato guulna aad kagaarto ganacsiga FOREX igala soo xiriir +252617017428, ama Email:  
[yuusufmustaf54@gmail.com](mailto:yuusufmustaf54@gmail.com)

*Haddii Aad Dooneyso In Aad Xubin Kanoqoto Kumanaanka Kun Ee Aan Waxbaro Website-Kan Iska Diiwaangali Hada*  
<http://www.somtechnew.com>

*Haddii Aad Dooneyso Vip Signals Tayo Oo Aan Bixiyo Aniga Oo Ah Qoraaga Buuggan Fadlan Email Ahaan Igu Soo Dir Codsigaaga*  
[yuusufmustaf54@gmail.com](mailto:yuusufmustaf54@gmail.com)

Haddii Aad Dooneyso Barookarka (Dulaalka) Aan Istimmaalo Fadlan Linkigan Hoose Kafuro Hada Real Account oo Forex Ah:  
<http://www.fxprimus.com/open-an-account?r=40167189&regulator=vu>

*Wixii tabarrucaad ah oo Aad ku dhiirigaleyo* Qoraaga buuggan  
fadlan ugu dir paypal: [yaremuqtaar2015@gmail.com](mailto:yaremuqtaar2015@gmail.com)

EVCPlus, Zaad, Sahal, Taaj ugu dir Lambarkan +252617017428  
(magaca ku qoran waa Mustaf Maanka Maax)

# Buuggan Waa FREE

*Fadlan Haddii Uu Jiro Qof Ka libiyay Buuggan  
Waxaad Ogaata Inaanu Raalli Ka Aheyn Qoraaga  
Buuggan Warna Uusan Uheyn Mhdsnd!*

**DHAMMAAD**